# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## XEERKA HAY'ADDA CAYMISKA QARANKA JSL. Xeer Lr. XX/2019

**ARAAR**

**Golaha Wasiirada Jamhuuriyada Somaliland**

| | |
|---|---|
| **Markay Arkeen**; | Baahida wayn ee loo qabo dhismaha Hay'add Qaran oo taabo geliya shirkaddo madaxbannaan oo caymis ah si dalka ay uga hirgalaan adeegyadda caymisyada ee kala duwan. |
| **Markay Arkeen:** | In si weyn loogu baahan yahay xeer lagu aasaaso Hay'add Qaran oo madax banaana una xil saran maamulka iyo sharciyeynta shirkadaha caymiska ee dalka. |
| **Markay Arkeen:** | In caymisku kaalin muhiim ah ka qaato horumarka dhaqaalaha, isagoo bixinaya adeeg iyo nidaam lagaga kabanayo khasaraha mood iyo noolba leh ee ka dhasha shilalka iyo aaafooyinka dabiiciga ah. |

**Sidaas Daraaddeed,** Golaha Wasiiradu waxay kalfaddhigoodii 50aad ku ansixyeen Qabyo-qoraalka Xeerka Hay'adda Caymiska Qaranka Somaliland. Xeer, Lr: XX/2019.

# Contents

**QAYBTA 1AAD** ..... 5
**QODOBO GUUD** ..... 5
Qodobka 1aad : Magaca Xeerka ..... 5
Qodobka 2aad: Erey Bixin ..... 5
Qodobka 3aad UJeedooyinka Xeerka ..... 5
**QAYBTAA LABAAD** ..... 6
**HAY'ADDA CAYMISKA QARANKA** ..... 6
Qodobka 4aad: Aas-aasida Hay'adda Caymiska Qaranka ..... 6
Qodobka 5aad: Madax-banaanida Hay'adda Caymiska ..... 6
Qodobka 6aad: Ujeedooynka Aas-aasida Hay'adda Caymiska Qaranka ..... 6
Qodobka 7aad: Xilka iyo waajibaadka Hay'adda Caymiska Qaranka:- ..... 7
**QAYBTA SADEXAAD** ..... 8
**QAABDHISMEEDKA IYO MAAMULKA HAY'ADDA CAYMISKA QARANKA** ..... 8
Qodobka 8aad: Qaab-dhismeedka Hay'adda: ..... 8
Qodobka 9aad: Gudida Hoggaaminta Hay'adda Caymiska. ..... 8
Qodobka 10aad: Xilka iyo Waajibaadka Gudida Hoggaaminta ..... 8
Qodobka 11aad: Shirarka Gudida Hoggaaminta ..... 9
Qodobka, 12aad: Hay'adda Caymiska Qaranka: ..... 9
Qodobka 13aad: Magacaabista iyo Xil ka Qaadista Gudoomiyaha & Gudoomiye ku xigeen Hay'adda: ..... 10
Qodobka 14aad: Shuruudaha Magacaabista Gudoomiyaha iyo Gudoomiye-Xigeen Hay'adda: ..... 10
Qodobka 15aad: Shuruudaha Xil ka Qaadista Gudoomiyaha iyo Gudoomiye-Xigeenka Hay'adda ..... 10
Qoddobka 16aad Muddada Xilka Goddoomiyaha iyo Gudomiye kuxigeenka Hay'adda ..... 11
Qodobka 17aad: Agaasimaha Guud ee Hay'adda ..... 11
Qodobka 18aad: Shaqaalaha Hay'adda Caymiska ..... 11
Qodobka 19aad: Xilka & Waajibaadka Gudoomiyaha Hay'adda: ..... 12
Qodobka 20aad: Xilka iyo Waajibaadka G/xigeenka Hay'adda: ..... 12
Qodobka 21aad: Xilka & Waajibaadka Shaqo ee Agaasimaha Guud ..... 12
Qodobka 22aad: Mushaharka & Gunooyinka: ..... 13
**QAYBTA AFRAAD:** ..... 13
**DAKHLIGA COMMISSIONKA CAYMISKA** ..... 13

Qodobka 23aad: Ilaha Dakhli ee Commissionka Caymiska Qaranka: ........................................... 13
Qodobka 24aad: Isticmaalka Dakhliga: ........................................... 13
Qodobka 25aad: Qaadhaanka/Khidmada Cayminta ee Hay'adda: ........................................... 14
**QAYBTA SHANAAD:** ........................................... 14
**QODOBO KALA DUWAN** ........................................... 14
Qodabka 26aad: Soo Saarida Wareegtooyinka (Directives) ........................................... 14
Qodobka 27aad: Wax kabadel & kaabista Xeerkan ........................................... 14
Qodobka 28aad: Burin ........................................... 14
Qodabka 29aad: Dhaqan-galka Xeerka ........................................... 14

# QAYBTA 1AAD

# QODOBO GUUD

## Qodobka 1aad : Magaca Xeerka

Xeerkan waxa lagu magacaabayaa Xeerka Aas-aaska Hay'adda Caymiska Qaranka.
Xeer Lr: XX/2019.

## Qodobka 2aad: Erey Bixin

Waxa erayadani loo fasirayaa ama loo micnaynayaa haddii aanu nuxurka tuduca ay ju jiraan micno kale siinin sida tan:

1) : **Hay'add** waxa loola jeedaa Hay'adda Caymiska Qaranka JSL ee xeerkan lagu Aas-aasay.

2) **Guddiga hoggaaminta** Caymiska: waxa loola jeedaa Guddiga La talinta & Kormeerka Caymiska ee xeerkan lagu dhisay.

3) **Shirkad:** waxa loola jeedaa shirkadaha fidinaaya adeegyada caymiska Qaranka ee Komishinku sharciyeeyay inay hawl galaan.
4) **Wakiil:** waxa loola jeedaa xafiisyada metalaya shirkadaha adeega caymiska fidiya ee wakaalad rasmiya ka haysta shirkadaha ay meteleyaan (Insurance Agencies), isla markaana uu sharciyeeyay Hay'adda Caymiska Qaranku.
5) **Khidmdle:** waxa loola jeedaa xafiisyada u shaqeeya hab dilaalis ah (Insurance Brokers) ee uu sharciyeeyay Hay'adda Caymiska Qaranku.

## Qodobka 3aad UJeedooyinka Xeerka

Ujeedada xeerkani waa:
1) In la abuuro Hay'add dawli ah oo u xilsaaran hirgalinta, maamulka iyo horumarinta adeegyada caymiska noocyadiisa kala duwan.
2) In la helo nidaam hufan oo dammaanad qaada ilaalinta hantida umada ee (Mood & nool) ba leh.
3) Fududeynta dhismaha adeegyada ganacsi ee maal-gashiga caymiska dalka oo xudun u ah koboca dhaqaale ee dalka JSL.

# QAYBTAA LABAAD

# HAY’ADDA CAYMISKA QARANKA

## Qodobka 4aad: Aas-aasida Hay’adda Caymiska Qaranka

1) Xeerkan waxa lagu aasaasay Hay’adda  Caymiska Qaranka oo ah hay'ad dawli ah oo yeelanaysa jiritaan qaanuuni ah, isla markana yeelanaysa astaan iyo shaabad u gaar ah,

2) Hay’adda Caymiska Qaranku waa hay’ad maamul iyo qawaanineed (Regulatory body) oo Qaranka Jamhuuriyada Somaliland uga masuul ah dhamaan maamulka iyo horumarinta hawlaha caymiska nocyadiisa kala duwan.

3) Hay’adda caymisku, si ay u gudato waajibadkeeda, waxay yeelan karaa hanti guurto iyo maguurto ah, waxana ay ku gali karaa magaceeda heshiis kasta, kuna dacwayn karaa ama lagu dacwayn karaa.

## Qodobka 5aad: Madax-banaanida Hay’adda Caymiska

1) Hay’adda Caymiska Qaranka JSL waxay u madax banaan yahay gudashada xilkeeda iyo waajibaadkeeda si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka. .
2) Xil gudashada Hay’adda Caymiska Qaranka waxa saldhig u ah Shareecadda Islaamka, Dastuurka JSL, Xeerkan iyo xeerarka/shuruucda kale JSL ee caymiska la xidhiidha.
3) Hay’adda Caymiska Qaranku isayadoo ka wakiil ah Xukuumada JSL waxay heshiish iskaashi/hormarineed la gali kartaa hay’adaha dhigeeda ah ee dalalka shisheeye, marka ay ogolaansho ka hesho Madaxweynaha JSL.
4) Xarunta guud ee Hay’addu waxay noqonaysaa Caasimadda JSL ee Hargeisa, waxaana ay laamo ka furan kartaa Gobolada dalka haddii loo baahdo.

## Qodobka 6aad: Ujeedooynka Aas-aasida Hay’adda Caymiska Qaranka

Ujeedada loo aas-aasaay Hay’adda Caymiska Qaranka JSL waxaa gun dhig u ah hirgalinta iyo maamulka, horumarinta iyo hoggaaminta, dabagalka iyo kormeerka ka ganacsiga caymiska noocyadiisa kala duwan, si loo ilaaliyo hantiilayaasha siyaasada caymiska (insurance policy holders) iyo adeega caymiska dalka Somaliland, arimahaas oo xudun u ah koboca dhaqaale ee dalka JSL.

## Qodobka 7aad: Xilka iyo waajibaadka Hay'adda Caymiska Qaranka:-

Hay'adda caymiska qaranku waxay yeelanaysaa xilalka iyo waajibadyadan hoos ku xusan:

1) Dajinta siyaasada Qaranka ee lagu hagayo abuurista nidaam dhamays tiran oo lagu taabo gelinayo caymiska iyo noocyadiisa kala duwan.
2) Ka tala- bixinta iyo Diyaarinta xeerarka iyo shuruucda lagu dhisayo shirkaddo caymis oo madax banaan isla markaana aan dawli ahayn iyo dhamaan xeer-hoosaadyada lagu maamulayo.
3) Jaangoynta, kala xadeynta, rukhsad siinta, rukhsad kala noqoshada, joojinta iyo hubinta tayada adeegyada caymiska ee shirkaduhu u fidinayaan macmiisha.
4) Baadhista, ka garnaqista cabashooyinka, xalinta khilaafyada maamul ee shirkadaha caymiska dhexdooda, ta macaamiisha & go'aan ka gaadhistooda.
5) Kormeerka iyo ilaalinta guud ahaan nidaamka caymiska dalka iyo adeegyada caymiska.
6) Xadeynta tacriifadaha adeegyada caymiska iyo habaynta heerka tayada adeegyada caymiska (Service Standards).
7) Ilaalinta xuquuqda macaamiisha, ta shirkadaha caymiska & dhowrista sumcadda iyo danaha Qaranka.
8) Diyaarinta war bixin sanadeedka Hay'adda iyo u gudbinta Madaxda Qaranka iyo Meelaha kale ee sharcigu waajibiyo.
9) Hubinta bixinta cashuuraha iyo takaaliifta la xidhiidha caymiska ee xeer waajibiyey.
10) In Wada shaqeyn dhow iyo iskaashi la yeelato Hay'adaha Qaranka iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ay shaqo-wadaagta yihiin.
11) Wacyi galinta bulshada iyo kor u qaadista aqoonta la xidhiidha adeegyada caymiska.
12) Hawl gelinta markii loo baahdo khubaro ay u xil saarto hawlo mucayin ah oo looga maarmi waayey.
13) Hay'adda Caymiska Qarank wuxuu Qaranka JSL ku metelaa xilka loo igmaday si loo xaqiijiyo ujeedooyinka loo abuuray.
14) Waxay Hay'addu qaadi kartaa dhamaan talaabooyinka lagu fulinaayo xeerkan ee u ah lagama maarmaan, taas oo ay ku jirto xaqa dacwad oogista iyo in ay garyaqaan u qabsadaan danaha Hay'adda si ay ugu matelaan sharciga hortiisa.
15) Si ay Hay'addu waajibaadkeeda shaqo u gudan karto, waxay heshiis la geli karaa dhinacyo kale ama cidii takhasus u leh hawlaha caymiska sida:- xeel dheerayaal caymis, gudiyo la talineed & la tataliyayaal madax banaan iyada oo la socodsiinaysa dhamaan go'aamada ay gaadhaan cida ay ka khusayso Qaranka, gaar ahaan gudida hogaaminta.

## QAYBTA SADEXAAD

## QAABDHISMEEDKA IYO MAAMULKA HAY'ADDA CAYMISKA QARANKA

### Qodobka 8aad: Qaab-dhismeedka Hay'adda:

Qaab-dhismeedka Hay'adda Caymisku waxa uu ka kooban yahay;

1) Guddida Hogaaminta Hay'adda Caymiska, (Governing Board),
2) Gudoomiyaha Hay'adda,
3) Gudoomiye-ku-xigeenka Hay'adda iyo
4) Shaqaalaha kale ee lagama maarmaanka u ah xilgudashadeeda.

### Qodobka 9aad: Gudida Hoggaaminta Hay'adda Caymiska.

1) Hay'adda Caymiska Qaranku waxay hoos tagaysaa Guddida Hoggaaminta (Governing board) oo u xil-saaran ansixinta siyaasada caymiska (Insurance policy making), kormeerka iyo dabagalka hawlaha Hay'adda iyo xaqiijinta in si habsami ah loo fuliyay ujeedada Hay'adda.
2) Guddiga Hoggaaminta Hay'adda Caymiska Qaranku waxay ka koobnaanayaan 7 xubnood oo kala ah;-
    1) Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda "Guddoomiye",
    2) Wasiirka Wasarada G/Warshadaha iyo Dalxiiska "xubin"
    3) Wasiirka Wasaaradda H. Caafimaadka "xubin"
    4) Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo H/Jidadka. "xubin"
    5) Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha. "xubin"
    6) Guddoomiyaha Baabka Dhexe ee JSL. "xubin"
    7) Guddoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka "Xoghayn"
3) Xubnaha Guddida Hay'adda ee ku xusan farqada 2aad ee Qodobkan waa magacaabaya Madaxweynaha JSL.

### Qodobka 10aad: Xilka iyo Waajibaadka Gudida Hoggaaminta

1) Guddidu waxay u xilsaaran tahay hoggaaminta guud iyo lasocodka habsami u socodka hawlaha iyo shaqooyinka Hay'adda.
2) si ay waajibaadkaasi u gudato, gudidu waxay qabanaysaa hawlahan soo socda:
    a) Ansixinta siyaasadda guud ee caymiska qaranka (Insurance Policy).
    b) Dib u eegista iyo ansixinta qorshayaasha istiraatiijiyadeed, ganacsi iyo maaliaydeed ee Hay'adda.
    c) kormeerista iyo dabagalka hawlgallada iyo shaqooyinka Hay'adda;
    d) Abaabulida dhaqaalaha iyo hubinta in uu ay hesho dhaqaale ku filan si ay u gudato waajibaadkeeda.

e) Ansixinta qorshaha maalgashi ee Hay'adda.
f) Ansixinta qaabdhismeedka, qorshayaasha iyo xeer-hoosaadada Hay'adda ee lagu dhaqan galinayo xeerkan.
g) Talo ka bixinta go'aanada maamul ee ka soo baxa Hay'adda Caymiska Qaranka marka rafcaan loo soo qaato.
h) Ka talo bixinta magaabida iyo xilka qaadista gudoomiyaha iyo gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda.
i) Qabashada shaqooyinka kale ee ay dhigayaan xeerkan xeerka caymiska iyo xeerarka kale ee khuseeya.

3) Gudidu waxay madaxweynaha u gudbinaysaa warbixin sanadeeka hawlohooda shaqo.

## Qodobka 11aad: Shirarka Gudida Hoggaaminta

1) Shirarka gudidu waxay noqonayaan shirar joogto ah iyo shirar aan joogto ahayn.
2) Shirarka joogtada ah waxay gudidu qabanaysaa (3) sadexdii biloodba hal mar, halka shirarka aan joogtada ahayn la qaban karo marka uu sidaa codsado guddoomiyaha gudidu ama ay codsadaan xubno aan ka yaran sadex meelood hal meel oo ah xubnaha gudida.
3) Shirarka gudidu waxay ku qabsoomayaan marka ay soo xaadiraan ugu yaraan (4) afar xubnood.
4) Shirarka gudida waxa guddoominaya gudoomiyaha gudida, hadii uu maqan yahayna cidda uu u igmado.
5) Go'aamada gudidu waxay ku ansaxayaan aqlabiyada xubnaha shirka fadhiya.
6) Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka ayaa ka masuul ah qaadida hadal qoraalada shirarka.

## Qodobka, 12aad: Hay'adda Caymiska Qaranka:

1) Hay'adda Caymiska Qaranku waa hay'ad dawli ah oo lagu aas-aasay si waafaqsan Qodobka 4aad ee xeerkan.
2) Hay'adda Caymisku waxay yeelanaysaa Gudoomiye, Gudoomiye-ku-xigeen iyo Agaasime Guud.
3) Hay'addu waxa kale oo ay yeelanaysaa shaqaale Waaxo (departments) iyo qaybo Farsamo kolba sida loogu baahdo.

## Qodobka 13aad: Magacaabista iyo Xil ka Qaadista Gudoomiyaha & Gudoomiye ku xigeen Hay'adda:

1) Gudoomiyaha iyo Gudoomiye-ku-xigeenka Hay'adda Caymiska Qaranka waxaa magacaabaya Madaxweynaha JSL, waxaana cod hal dheeri ah ku ansixinaya Golaha Wakiilada.
2) Gudoomiyaha & Gudoomiye ku xigeen Hay'adda waxa xilka ka qaadi kara oo kaliya Madaxweynaha JSL kadib marka uu kala tashado Guddida hoggaminta (Governing Board).

## Qodobka 14aad: Shuruudaha Magacaabista Gudoomiyaha iyo Gudoomiye-Xigeen Hay'adda:

1) Shuruudaha looga baahan yahay gudoomiyaha iyo gudoomiye xigeenka Hay'adda caymiska qaranku waa:
   a) In ay yihiin muwaadiniin reer Somaliland ah.
   b) In ay yihiin Muslim, asluub & akhlaaq wanaagsan bulshada ku dhex leh.
   c) In ay leeyihiin aqoon wax barasho heer jaamacadeed ah haystana ugu yaraan shahaadada darajada1aad (Bechelor Degree)
   d) In ay leeyihiin khibrad shaqo oo aan ka yareyn 5 sanadood.
   e) In aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ciqaab ah 5 tii sano ee ugu danbeeysay.
   f) In ay maskax ahaan iyo jidh ahaanba caafimaad qabaan.
   g) In ay ku sifoobaan xilkas, akhlaaq wanaag, toosnaan isla markaana leeyihiin sifo dhexdhexaadnimo, karti iyo daacadnimo.

## Qodobka 15aad: Shuruudaha Xil ka Qaadista Gudoomiyaha iyo Gudoomiye-Xigeenka Hay'adda

1) Guddoomiyaha iyo Gudoomiye kuxigeenka waxa xilka laga qaadi karaa shuruudahan:

   a) Marka uu xilka gudan kari waayo karti darro awgeed fadhiid ka dhigta hawshii Hay'adda
   b) Marka uu ku kaco anshax-xumo, xatooyo, musuq-maasuq iwm.
   c) Marka uu iscasilaad qoraal ah u gudbiyo Madaxweynaha, Madaxweynuhuna ka aqbalo.
   d) Marka uu galo dambi xadhigiisu gaadhayo muddo sadex (3) Sano ah ama ka badan.
   e) Marka uu gudan kari waayo xilkiisa sababo caafimaad darro ama bukaan maskaxeed awgeed oo ay cadeeyeen guddi dhakhaatiir ah oo ka diwaangashan Wasaarada Caafimaadka.

## Qoddobka 16aad Muddada Xilka Goddoomiyaha iyo Gudomiye kuxigeenka Hay'adda

1) Muddada xilka Gudomiyaha iyo kuxigeenka gudoomiyaha Hay'adda Caymisku waa (5) sannadood laga bilaabo maalinta maxkamada sare u dhaariso xilkaasi, waxaana xubinta dib loo dooran karaa hal (1) mar oo kale.

## Qodobka 17aad: Agaasimaha Guud ee Hay'adda

1) Si loola xisaabtami karo isla markaana aan culays shaqo uga iman Karin, loona waafajiyo aqoonta ay hawshan shaqo u baahan tahay, Hay'addu waxay yeelanaysaa Agaasime Guud oo uu magacaabo Madaxweynaha JSL.
2) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Caymisku waa;
   a) In uu yahay qof aqoon sare u leh maamulka & maareynta, isla markaana hanan kara hawl maalmeedka Hay'adda.
   b) In uu leeyahay ugu yaraan aqoon jaamacadeed heerka 1aad (Bechelor Degree) iyo waayo aragnimo shaqo oo aan ka yareyn 5 sano.
   c) In uu Ku sifoobay akhlaaq wanaag, karti iyo hufnaan shaqo.

3) Qofna looma magacaabi karo Agaasimaha Guud ee Hay'adda haddii;

   a) Uu yahay saamiile Shirkadaha caymiska, ama uu yahay xubin ka mid ah Guddi shirkad caymis ama shaqaale shirkad caymis.
   b) Uu yahay Qof lagu xukumay fal-dambiyeed la xidhiidha khiyaamo ama daacad-darro oo ay ku xukuntay Maxkamad awood u leh oo ku taala Somaliland ama meel kale.
   c) Haddii uu yahay sarkaal dawladeed, xubin ka tirsan golayaasha sharci dejinta ama xubin ka tirsan goleyaasha deegaanka.

## Qodobka 18aad: Shaqaalaha Hay'adda Caymiska

1) Hay'addu waxay shaqaalaysiin kartaa shaqaale loo raacay si waafaqsan nidaamka shaqaalaysiinta hayada shaqaalaha dawlada. Marka uu Gudoomiyuhu u arko lagama maarmaan ama gudasho la'an shaqo, waxa shaqaalaha xilka lagaga qaadi karaa si waafaqsan xeerka shaqaalaha dawlada.

2) Hay'adda caymisku waxay shaqaalaysan kartaa khubaro la talineed iyada oo xilkooda iyo mudada shaqadooda ay go'aamiso Hay'addu.

### Qodobka 19aad: Xilka & Waajibaadka Gudoomiyaha Hay'adda:

Xilka iyo waajibaadka Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka waxa ka mid ah:

1) Hogaaminta guud ee Hay'adda.
2) Socodsiinta, hagista iyo maamulida dhamaan hawlaha Hay'addu u xil saaran tahay.
3) Maamulka iyo maaraynta hawl-maalmeedka Hay'adda
4) Metelaada iyo ku hadalka magaca Hay'adda.
5) Gudoominta shirarka guud ee Hay'adda.
6) Soo jeedinta miisaaniyada Hay'adda, markuu la tashado xubnaha hogaanka fulinta
7) Go'aaminta iyo soo bandhigida dhamaan qorshayaasha iyo barnaamijyada hor u marineed, xisaab xidhyada iyo dhamaan wixii kale ee la xidhidha hawsha Hay'adda.
8) Saxeexida heshiisyada iyo dhekumentiyada rasmiga ah iyo kuwa maaliyadeed ee Hay'adda.
9) Qorshaynta, kormeerka iyo dabagalka shaqooyinka Hay'adda si waafaqsan siyaasadda xukuumadda iyo qorshaha Hay'adda.
10) Isku dubaridka qorsheyaasha kala duwan ee lagu hormarinayo hawlaha Hay'adda.

### Qodobka 20aad: Xilka iyo Waajibaadka G/xigeenka Hay'adda:

Xilka iyo waajibadka gudoomiye xigeenka Hay'adda waxa ka mid ah:

1) Gudashada xilka Gudoomiyaha Hay'adda mar kasta oo uu Gudoomiyuhu maqan yahay & marka ay banaanaato jagada Gudoomiyaha Hay'addu.
2) Wuxuu ka caawinayaa gudoomiyaha habaynta hawlaha kala duwan ee shaqo.
3) Gudashada waajibaadka kale ee Gudoomiyuhu u igmada.

### Qodobka 21aad: Xilka & Waajibaadka Shaqo ee Agaasimaha Guud

Xilka iyo waajibadyada agaasimaha guud waxa ka mid ah:

1) Gudashada hawl maalmeedka Hay'adda Caymiska Qaranka JSL.
2) Hawl-galinta dhamaan shaqaalaha Hay'adda Caymiska iyo kormeerida hawl maalmeedkooda.
3) Isku xidhka xafiisyka Hay'adda iyo shirkadaha caymiska.

4) Qaadista hadal qoraalka fadhiyada Hay'adda iyo shirarkeeda.
5) Soo diyaarinta war bixinada Hay'adda (Bille, 3 biloodle, lix biloodleiyo sanadlaha ah).
6) Dhaqan galinta & fulinta awaamiirta & go'aanada Hay'adda ka soo baxa.
7) Qabashada dhamaan hawlaha kale ee Gudoomiyuhu u igmado.
1) Agaasimaha maamulka waxaa uu hoosyimaadaa Gudoomiyaha Hay'adda, waxaana uu ku shaqeeyaa awaamiirtiisa si sharciga waafaqsan.

**Qodobka 22aad: Mushaharka & Gunooyinka:**

1) Guddoomiyaha, guddoomiye-ku-xigeenka iyo agaasimaha guud waxay yeelaayaan mushahar iyo gunno xil, si waafaqsan miisaaniyada Hay'adda ee loo ansixiyo.
2) Mushaharka iyo xuquuqda maaliyadeed ee ay yeelanayaan shaqaalaha kale ee Hay'adda Caymiska Qaranku waxa loo raacayaa si waafaqsan xeerka shaqaalaha dawlada iyo xeerarka kale ee dalka.

## QAYBTA AFRAAD:

## DAKHLIGA COMMISSIONKA CAYMISKA

**Qodobka 23aad: Ilaha Dakhli ee Commissionka Caymiska Qaranka:**

1) Ilaha Dakhli ee Hay'adda Caymiska Qaranku waxay kala yihiin:
   a) Miisaaniyada ay u qoondayso xukuumadu oo ka mid noqonaysa miisaaniyada qaranka.
   b) Qaadhaanka/khidmada caymiska (Insurance Levy) ee ay shirkadaha caymiska iyo wakiiladoodu u qabtaan Hay'adda caymiska qaranka.
   c) Deeqaha uu ka helo deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah iyo hay'adaha madaxbanaan ee sharciga waafaqsan.
   d) Daymaha uu ka helo dawlada sida baanka dhexe si miisaaniyada commissionka waafaqsan iyo
   e) Ilihii kale ee ay ansixiyaan gudidu.

**Qodobka 24aad: Isticmaalka Dakhliga:**

Hay'adda Cymiska Qaranku maaliyada ay hesho waxay u adeegsanaysaa:-

1) Ku bixin gunooyinka iyo socdaalada fidinta maamulka iwm.
2) Tababarada, wacyigalinta dadweynaha iyo kharashyada kale ee u sahlaya Hay'addu in ay gudato waajibaadkeeda shaqo si dhmaystiran, isla markaana waafaqsan xeerkan.

3) Ku bixinta mushaharooyinka iyo gunooyinka kale ee shaqaalaha ama gudiyada kale si waafaqsan oo uu dejiyey ama rasmiyeeyay ogolaanshaheeda hogaanka sare ee Hay'addu.

### Qodobka 25aad: Qaadhaanka/Khidmada Cayminta ee Hay'adda:

1) Shirkadaha Caymisku markasta oo ay shay ama walax & adeeg caymis fidiyaan, waxay Hay'adda Caymiska Qaranka u qaadayan ama ku darayaan qadarka lacagta caymiska ee ay qaadayaan, khidmada loo yaqaan ama loogu yedhayo khidmada Hay'adda Caymiska Qaranka si loogu maal galiyo hawlaha shaqo ee Hay'adda.
2) Khidmada caymis ee Hay'adda Caymiska Qaranka loo qaadayaa waxay noqonaysaa 5-10% qiimaha guud ee adeega caymiska (Insurance Premiums) ka walaxda/shayga lagu caymiyey ka hor inta aan lagu darin wixii cashuuro ku waajibay, taas oo ku soo xeroonaysa 30 malmood gudahood ka bilaabmanta maalinta la qaadey khidmadaas.
3) Tilmaamaha guud ee khidmada caymiska ee ku xusan firqooynka sare ee qodobkan, sida loo bixinayo iyo qadarka loo saarayo caymisyada kala duwan, waa in lagu faah-faahiyaa xeerka shirkadaha caymiska.

## QAYBTA SHANAAD:

## QODOBO KALA DUWAN

### Qodabka 26aad: Soo Saarida Wareegtooyinka (Directives)

Si loo fududeeyo dhaqan-galka xeerkani, Hay'addu waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyayaashaa lagu dhaqan galinayo xeerkani

### Qodobka 27aad: Wax kabadel & kaabista Xeerkan

Xeerkan wax ka badel, kaabis & kordhinba waa lagu sameyn karaa mar kasta oo loo baahdo ama ay duruufi keento si loola jaan qaado baahida & duruufaha jira ee waqtig, iyadoo la marinaayo nidamka iyo sharciga JSL.

### Qodobka 28aad: Burin

Waxa uu xeerkani burinayaa xeerar kasta oo aan waafaqsanayn ama ka soo horjeeda qodobada xeerkan Diinta islaamka iyo Dastuurka JSL.

### Qodabka 29aad: Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan geleyaa marka uu golaha baarlamaanku ansixiyo isla markaana uu saxeexo Madaxweynaha JSL laguna soo saaro faafinta rasmiga ah si waafaqsan qodobada 75 iyo 76 ee dastuurka.